Jamhuuriyadda Federaalka Soomaaliya
Baarlamaanka Federaalka Soomaaliya
Golaha Shacabka

Hadal-qoraalka kalfadhiga 7-aad
Documentiga Kal.7-aad kul.8-aad **14/11/2015**

Kalfadhiga 7-aad
Kulankiisa 8-aad Saac.fur.12:10gd.Saac.Xir.12:45 gd.
Guntinta(Quorum) 162-Xildh.
Ajendaha:-

1. **Furitaanka Aayadaha Qur'aanka Kariimka ah**
2. **Ansaxinta Ajendaha**
3. **Qaraarka ku aadan darbiga Kenya ay ka dhiseyso Xuduudka Golaha Shacabka ay ka soo saaraan Sharci.**

1.Shir-guddoomiye ,Guddoomiyaha Baarlamaka JFS Mudane Maxamed Sheekh Cusmaan (Jawaari).

Waxaa shirka Furey Gudoomiyaha Baarlamanka JFS. Mudane Maxamed Sheekh Cusmaan (Jawaari),waxaa lagu furey Aayadaha Qur'aanka kariimka ,uuna akhriyey Xildhibaan Sheekh Shaacir.

2.Guddoomiyaha wuxuu sheegay in kalfadhiga 7-aad kulankiisa 8-aad uu furanyahay Ajendaha maanta uu yahay Qaraarka ku aadan derbiga Dawladda Kenya ay ka dhiseyso Xuduudka Soomaaliya, loona baahanyahay in la ansaxiyo Ajendaha Maanta Xildhibaanadana way ansaxiyeen.

Xildh.C/llaahi Jaamac ,wuxuu sheegay in mesha ah Qaraar lagu bedelo Sharci,waayo qaraar waxaa ka xoog badan Sharci.Sharcigaana wuxuu noqonayaa 3(Seddex) qodob :-

- Xuduudaha Soomaaliya waa la yaqaan ,waana laguma xad-gudbaan.
- .Inta laga gaarayo Baarlaman Shacabka Soomaaliyeed soo doorta in aan laga hadli Karin Xuduuda Soomaaliya.

- Ciddii ku xadgudubta waxaa loo aqoonsanayaa qiyaamo Qaran.

Xildh, Maxamed Cumar Dhalxa ,wuxuu akhriyey soo jeedinta Qaraarka Baarlamaani ee ku aadan Darbiga Kenya ay ka dhiseyso Gudaha Soomaaliya. Wuxuuna sheegay in Guddoomiyaha Golaha Shacabka uu u xilsaarey in ay ka soo tala bixiyaan labada Guddi ee Arrimaha Gudaha & Amniga iyo Guddiga Arrimaha Dibadda &Iskaashiga Caalamiga.

Guddiga markuu arkey doodii kululeed ee Golaha Shacabka ay kaga doodeyn arrinta darbiga ay dawladda Kenya ka dhiseyso Gudaha Dalka Soomaaliya tr.11-ka Bisha November 2015-ka.uuna xaqiijiyey jiritaanka ku xadgudubka Xudduda Gudaha Dalka Soomaaliya.ayna jebisey Dawladda Kenya Shuruucda Caalamiga iyo midda heer Gobol ee ku dhisan deris wanaaga.waxaa guddiga u mudnaatey tixgelinta Dareenka Shacabka Soomaaliyeed iyo madax banaanida Qaranka Soomaaliyeed .Iyo markuu arkey Qodobka 7-aad ee Dastuurka Qaarnka .

18 Augost 2015-ka wada hadalakii dhexmarey Soomaali iyo Kenya loogana hadlayey qodobo ka mid ah joojinta darbiga laga dhisaayo Xudduda Soomaaliya.

Guddiga isagoo ka ambaqaadayo qoodobada sare ku xusan wuxuu soo jeediyey arrimha soo socda : -

- In Dowladda kenya ay joojiso dhismaha Darbiga si deg-deg ah oo rasmi ah.
- In dowladda kenya ay ka fogaato burburinta iyo tir-tirida Calaama xuduudeedkii ay dhigeyn Dowladihii Isticmaarka ee u dhaxeeyey labada dal.
- In dowladda Kenya ay ilaaliso xiriirka walaaltinimo iyo saaxiibtanimo ee ku saleysan deris wanaagga .
- In la baajiyo xasaradda iyo dhibaatooyinka ka abuurmi kara sii wadida dhismaha derbiga sharci darada ah .
- Si loo abuuro Jawi ku dhisan kalsooni iyo is aaminaad ,in muddo kooban gudahood dowladda Kenya kala baxdo Ciidamadeeda guud ahaan dalka Soomaaliya.

Dhanka kale ,guddiga waxay soo jeediyeen in Golaha Shacabka ay qaadaan tallaabooyinka soo socda:

- In Dowladda Soomaaliya ay weydiisato Ururka Qaramada Midoobey ,Golaha Amaanka Ururka Midowga Africa ,Ururka midowga Yurub,Jamacadda Carabta iyo IGAD , sidii ay gacan ugu geysan lahaayeen Bixitaanka Ciidamada Kenya iyo Xoogagii kale ee buuxin lahaa kaalintooda .
- In Beesha caalamka gacan ka geysato meel marinta Qaraarka Golaha Shacabka Soomaaliyeed.

- In Hay'adda Dastuurka iyo Maamul Goboleydyada ay ilaaliyaan ku dhaqanka Dastuurka iyo Xeerarka Dalka ee la xariira Madax Banaanida Dhuleed ,Badeed iyo Hawadeed ee Dalka Soomaaliya.
- In la magacaabo Guddi Isku dhaf ah oo ka kooban Xukuumadda iyo Baarlamanka,kaas oo xaqiijiya fulinta iyo Dhaqangelinta Qaranka.

Xildh. C/llaahi Goodax Barre,wuxuu sheegay inay yididiilo iyo farxadba u tahay imaatinka Guddoomiyaha Baarlamanka,Qaraarka Baarlamanka horey ay u soo saartey ma aha qaraar UN.wuxuu soo jeediyey Qaraarka Baarlamanka in Sharci loo bedelo sida :

- Inta laga helaayo dowlad ay shacabka Soomaaliyeed doorateyn,xudduda Soomaaliya waa mid lama taabtaan ah oo muqdis ah.

- In hadda heshiis la draft-igareeyey sharcigaa iyo sharciyo kale ay jiraan

- Sida sharci loo sameyn lahaa ,waa in la sameeyo guddi Adhoc Committee soo diyaariya muddo 48-saac kadibna Golaha la horkeenaa .

3.Guddoomiyaha wuxuu sheegay in dabagalka ay u xilsaaranyihiin guddiga u xilsaaran waxaana waajib ku ah in ay dabagalaan. In qaraarka loo bedelo Sharci cid ku ayiday (sakangareysey) ma jirtaa .

Xildh.Nuur Faarax ,wuxuu sheegay maadaama ay soo noqnoqotey arrinkaan Xudduudaha

- wuxuu soo jeediyey in siqoto dheer oo sharciyeeysan qaraarka loogu bedelo Sharci .

- Sharciga go'aankii lagu gaaro Dhul ,Cir iyo Bad Ciddii ku soo xadgudubto Golaha Baarlamanka wuxuu soo saaro waa mid laguma soo xadgudbaan ,wuuna ayidey (Sakangareeyey)..

4.Guddoomiyaha wuxuu soo jeediyey in qaraarka Sharci laga soo saaro xildhibaanada ogol ay gacanta taagaan ,waxay u dhacdey sida tan: -

160 Xildh. way ogolaatey
2 Xildh. Way diideyn
0 Aamus

Guddoomiyaha wuxuu soo jeediyey in labada Guddi ee shaqada ku leh sida Guddiga Arrimaha Gudaha &Amniga iyo Guddiga Arrimaha Dibadda & Iskaashiga Caalamiga. Ay ka soo shaqeeyaan Sharcigaan una soo gudbiyaan maalinta isniinta Golaha Baarlamanka.

Xildh. Jeesow wuxuu u sheegay Xildhibaanadda Baarlamanka cidii dooneysa iney gacan ka geysato ay ugu imaan karaan Guddiga Villa Hargeysa.

Xildh. Dhalxa wuxuu soo jeediyey in Guddiyada lagu soo daro Wasaaradda Gaashaandhiga si ay wax ula qabtaan Guddiyada Kale.

Xildh. C/samad,wuxuu sheegay in uu ogsoonyahay in dowladda ay ku soo foodleedahay arrimo kale, labada guddi Baarlamaka waa in ay keenaan sharciga muddo kooban , waa inuu ka soo Golaha Baarlamanka amar cad-cad oo lagu joojinaayo Disidda darbiga sharcidarada ah ee Xuduudka.

Xildh. C/laahi Coonka wuxuu sheegay in Guddoomiyaha uu yiri ,Guddiga ayaa u xilsaaran arrimahaan ,aaway kaalinta Guddoomiyaha .

Xildh.Khaalid wuxuu sheegay in Wasaaradda Arrimaha Dibadda ay heyso shaqooyin badan oo ah hagaajinta xiriirka laba geesoodka ah ,Sida duulimaadka Diyaaradaha Safaradda wajeer maraaya oo laga soo saarey Draft.iyo arrimaha qaxootiga waxay la kulmeyn Wasaaradda Cooperation iyo Arrimaha Dibadda ee Kenya .haddana waxaa la doonayaa aarimahasi in la siiwado ,kuma jirto tan badda.Xildhibaanada sheegaya in uu jiro heshiis gaar ah oo qarsoodi ah wuxuu ka codsadey xildhibaanadda taa in la soo bandhigo haddi wax cad la haayo.wuxuu xaq u leeyahay in uu soo bandhigo fekirkiisa.wuxuu intaa ku darey in ay Golaha hortiisa ugu dhaarteyn in aan la sameynin wax xadgudub ah.

5.Guddoomiyaha wuxuu sheegay in Sharciga la keeno 48 Saac gudahood lana keenaa Golaha Baarlamanka maalinta Isniinta ay taariikhdy tahay 16 November 2015-ka.

In labada Guddi ee kala ah Guddiga Arrimaha Gudaha & Amniga iyo Guddiga Arrimaha Dibadda Iskaashiga Caalamina ay isugu yimaadiin Villa Hargeysa.

Kalfadhiga 7-aad Kulankiisa 8-aad uu shir-guddoominaayey Guddoomiyaha Baarlamanka JFS Mudane Maxamed Sheekh Cusmaan Jawaari uu sheegay in uu shirka xiranyahay saacaddu markey aheyd 12:45gd